# Dowladda, iyo Geeddiga Socda

**A. M. Yusuf**© ¦ wayeel@operamail.com

**"Ma is hiifay waxa aan mar hore dhiig u huri waayey?...**
**Hantideenna yaa yiri safiih hayska halabeeysto?**
**Nin hunguri ku hawl gala maxaa bada hoggaankeenna?"**
**(Cali Maxamuud Xiirane: Hungo, 05/10/2006)**

In kasta oo nimaan og ahay ay wax ii galeen, Ilaahay ha u naxariisto. Ninka rafiiqnimo ayaa naga dhexeyn jirtay. Walow aan sidiisii oo kale, aan u liilgeli kareyn; hase ahaatee, maanta waa in aan tiriyaa. Bal aan ku furo shirib, kaas oo wax badan iga fududeyn doono culeyska qoraalkan:

**Indhii bukaa bikaacsadoo Beledki-Xamar baas ma yaal**
**Tanya Joowhar ya Jawiil Jirrigi joogay waa jabeen**
**Jubbadi Hoose jawrkii yiil Jirriddiyaan ka soo jarnee**
**Shabeelle Hoose Shiiqi yiil Shaxeeximeyn shariya been**
**Mudug iyo Bari ways maqleen Munaafaq mug dhow waa baxaa**
**Hooskeey hu'geeda haatiseey Hargeyso hiil naga helee**

**Baruud holceeyso bug ya qiic Ar Baydhabaw baroodku☠ yaal:**
**"Ma' fadaaw!" maanta ay tiraa Muggaas Maxkamaddeey rabtaa**

☠ **barood**: **karood**. waa buukaan qaba jirro halis ah; cudur aan laga kicin oo weliba na si degdeg ah wax u dila. "*Karood ha ku dilo*," waa la isku habaaraa. Baruuddu na, waa barood oo kale. Ma kastay hadda?

Noloshayda waan u huri doonaa si aan ula dagaallamo dowladda FKM, haddii ay dalka Amxaaro ku wadeeceyso, haddii ay keenayso Afrikaan aydhis sida, haddii ay horseedayso olole lagu naafeeynayo Islaamka, weliba na takoorta *4.5* ay taabbagelinayso. Nuxurka hadalkaygu waa: Nacab u ihi maamul kasta ee Soomaaliyeed oo aan kalsooni ka haysan ummaddiisa.

Shicibka Soomaaliyeed wax la dilo ama soo dandarreeyo ba, indhoweyd ayuu geeddigiisii soo gaaray bartii kalabayrka—laakadii runta iyo beenta. Isaga oo isku duuban na waxa ay u bayray dhankii haloosigii xaqa. Waddadaas markii uu maray ayaan is weydiiyay, weydiin culus: Ma shacabka ayaad ka iilataa oo dowlad dadkeedii ba gabtay ayaad hiilka ugu geysaa Baydhabo? Xirgiga yar ee weli aniga igu harsan ayaa ii diidaya, dowlad-ku-sheegta, in aan dib dambe kabaha ugu sii qaado, mooyaane in aan iyada hilfaha u sii qaado. Waad la socotaa, dhismehii dowladda FKM, dowladdii dibuheshiinta, waagii dagaaloogeyaashu ay soo xuleen, in dadweynehu uu horey ka oggolaaday; bilo yar kadib se, waxa uu shacabkii ogaaday dhagartii ay hoosta ku wadatay; haddii ay suurtagasho xitaa in ay madax dalka ka sii noqdaan, shacabku dib dambe uma rumaysan doono Cali Maxamed Geeddi, iyo xildhibaanno kale oo badan. **Ninkaan kutiri-kuteen badan ayuu yaqaannaa; shacabku se hal wax oo weyn ayuu yaqaannaa—Qur'aan.**

Gacalkayow feejignow: Goordhow waa kalabixii. Kolley anigu Muslim Soomaaliyeed ayaan ahay: waxa aan la dhaqan, waxa aan la dhiman, waxa aan dheegan kuwii raacay dhabbihii toosanaa—kuwii kor u qaaday Kalmadda Ilaahay. Dowladda gaabiska ah, haddii geeddigii shacabka ay la socon waday, miyaad ka oggolaanaysaa in ay xilkeedii ku wareejiso cadowgii dalka? Kalsooni ay iyadu kaa kasban wayday, ma Tigrooni ligis badan ayaa adiga kaaga keeni kari doonaa? Waa maya! Hawshii dibuheshiisiinta Soomaalida, ogow in dowladda FKM ay ku wareejisay nacabkii qaranka Soomaaliyeed. Tusaale yar na aan kaa siiyo dhaqanka uu "*cadowgaagu*" la imaan doono:

Ma maqashay saraakiil Ingiriis ahaa (maxaabiis dagaal, Dagaalkii II) ee diidday in ay wax ka dhisaan Buundadii Webiga Kwaay, Taayland—marin boqortooyadii Jabaan u dhisan lahayd sidii ay sahay iyo sanaad ba u gaarsiin lahayd cidamadeedii fadhi jiray dalka la yiraahdo Burma.

"*Waxaan nahay saraakiil sare. Marka la tixraacayo heeshiiskii Jeneefa, ma bannaana in shaqo taas oo kale ah nala ku jujuubo*," ayuu ku dooday sarkaal Ingiriis ahaa.
"*Halkaan ma joogo wax la yiraahdo ama sarkaal ama dable Ingiriisi ah.*" Sarkaalkii reer Jabaan na, si jeesjees lahayd ayuu u yiri weero caanbaxay. "*Dhammaantiin waxaad tihiin maxaabiis Ingiriisi ah. Anigu idin kuma sandulleyn hubkiinnii in aad dhigtaan, cadow na isu dhiibtaan. Jeniifada aad sheegtay, aniga la iiga ma soo tebiyo farriimaha: Amarrada Jeneraal Yamamooto oo qura ayaan na fuliyaa.*"

Ogow haddaba, dhagarqabeyaasha soo horkacaya cadowga; anigu waa iskugu kay mid, waa ii cadow iyo miiro cadow. Halkaan waxa aan la hadlayaa waa inteenna qabka leh: Haddii aan hubkeenna ku diriri wayno, inta ay goori goor tahay, ma jiri doono Soomaali haybad leh ama Soomaali qaayo dhaama, Soomaaliga kale—kolka aan ka wada hoosmarno kabihii *nacabkeennii*. Haddaba, wixii maanta ka bilowda, halkudheggu waa: **Iilkii gal; ha hoosgelin buudkii Tigrooniga.**

ISKA DHAW manexaha jiritaankaaga neceb. Badbaadi dalkaaga iyo dadkaaga. War dhulkeennii miyaan dhuminnaa mise waan dhacsannaa? Dhaxal ma u hambaynaa faca naga dambeyn doono? Taariikhda ayaa naga sugaysa in aan iyada boggeeda halgan ku saxiixno. Iska jir, taariikhda dib ayay u soo eegi doontaa berigii jiilkeennaan uu joogi jiray ciidda Soomaaliya guudkeeda. Ilmaheenna danbe taariikhda ha ka barteen dhiiggeennii in aan ku qornay sheeko la yiraahdo "Ha-Noolaatadii Qarnigii XXI". **Naftaada oo qura ku badbaadi, noloshii laguug firkaagii ah**. Ama hadda ama hadhowto, jeer ay ahaato ba, kolley waad dhiman! Ogow na, eel aan weligeen naga hari doonin ayay soo siddaa Dowladda FKM. Ka dhiidhi kufsideyaasha loo soo daabbulayo gabdhaahagii. Diid cudurka loo soo wado reerkaagii. Diid gumeystaha madow. Kahortag tuugta bililiqeysan doono dalkaaga—dhaxalkaagii—inta aan ay weli *hooddi* ku soo oran "**jirrigii Itoobiya**", "**mooryaankii Ugaandha**", iyo "**daydaygii Keenya**".

Maxaysatada shisheeyaha, jebi: koodii aad ku aragto, dil; koodii aad meel ku maqasho raadsi oo dil; koodii fakada soo qabo oo qal—bakhtigiisa na ku quusi reerkiisii oo u dir sarirkiisii. **Halgan ayaan kugu og ahay! Oo "hayaalkii ducaan kuu naqee hibada aamiin dheh".**

Ma jirtaa suurad Qur'aan ah oo na baraysa in qabiil dhiman iyo qabiil dhammaystiran uu Eebbe abuuray? Dowlad-ku-sheegga foolxumadaas ayaa ka mid ah tiirarkii lagu dhisay, markeedii hore ba. U fiirso daawdarrada (cadaaladxumida) weyn ay meesha ku hayaan. Kuwa ay nuqsaanka ku sheegayaan, cilmi iyo xigmad, labada ba, mid ay ku dhaamaan miyaa jira? Waa ayaandarro weyn. War sow sinjifaquuq cad ma aha? Waa gef loo geystay karaamadii uu Ilaahay aadmiga ku mannaystay. "*Adinka oo idil Aadam baad ka soo jeeddaan; Aadaan na turaab*," Maxammad (scw), Rasuulkii Ilaahay, ayaa asxaabtiisii baray. Dowladdu, Qur'aan ama Xaddiith muqaddas ah ha u soo hesho **4.5**. Haddii kale, warku dood qura kuma ekaan doono—waa dagaal, kolley aniga, waxa ay iga sugtaa ba. Maxay adiga kula tahay *afar dhibic shan*? Marka aan tibaaxdaas baas in yar ka sii sheego, dagaaloogeyaashii dowladda FKM soo dhisay, sow kuma ayan fasirin "**Others**". Qof lagu tilmaamay in uu yahay "**inkale**", siduu "**in Soomaali ah**" haddaba uga mid noqon karayaa? Haddee Tigrooni, iyo Sawaaxiliga, iyo Baadariga jooga Fatikaanka iyagu na Soomaalida ayay ka mid yihiin; waa "Ohers", illayn. Sidaas awgeed na xaq ayay u leeyihiin Meles Zenawi, Mwai Kibaki, iyo Yoweri Museveni in ay ka taliyaan ayaayeha Soomaaliya, sow maaha? Waa inkale, illayn! Ma rumaysni, waa eedenayaa, waa na aan ka soohorjeedaa cid kasta oo aaminsan waxa la yiraahdo "Others".

Muxuu Md Cali Maxammad Geeddi ka helayaa in uu dadkiisa, weli degmadiisii uu ku sheego meel Al-Qaacidda ka taliso? **Mise meeshii Al-Qaacidda joogto, nabaddu na in ay joogto, ayuu uga jeedaa?** Raggii 16 sano nabadda Soomaaliya hortaagnaan jiray ayay Maxkamaduhu eryeen. Dagaaloogeyaashii markii ay Baydhabo u baxsadeen, maxaa magaaladii ka billowday: Sow maahan dil, toogasho, qarax, iyo cabsi joogto ah? Md Geeddi ma Mareykanka ayuu se ka indho, dhego, iyo ilbaadsi badan yahay? Mise **mingiskii Md Cabdullaahi Yuusuf ee Shimbiraale** ayaa ku dhacay—sidaas awgeed na jafaliile ayaa afkiisa ka yeersiinayo ereyada baas?

Maxkamadaha wanaag bay keeneen, iyo Maxkamaduhu waa Al-Qaacida, afkiisa ayaa laga hayaa. Md Cali Maxammad Geeddi waa nin shalay warkii uu yiri, jeclaan lahaa in uu maanta dafiri kari lahaa. Waa nin aan xitaa xusuus u lahayn gefafkii uu ku hadlay sandkii tegay—qoom dhan oo Soomaaliyeed ayuu aayehoodii ku ciyaaray. Wax cudurdaar ah ee uu illaayo maanta la joogo ka bixiyay na, arrinkaa isaga ah, ma jiro. Waa baqbaqaa dhaajiya codka keligitashadeha Tigrooniga, asii aan garanayn ujeeddada ay xambaarsan yihiin dhawaaqyada uu ka daba jiibinayo. Laga soo qaado berigaas, anigu ninkaas la yiraahdo Dr, Prof, Md, iyo RW Cali Maxammad Geeddi, Soomaalida iigu ma aan uu tirsanayn. Tiradii naga dhimatay ama—aan si ku habboon u sheego—: *intii naga dufoowday* ayaan berigeedii, hore u sii

raacsiiyay. Haatan waxa uu u soo dhigtay inteennii qabka lahayd in uu sii dabarjaro. Haddii aan sheegi lahaa hal argagixiye ee jooga Soomaaliya, isaga qudhiisa ayaan farta ku fiiqi lahaa. Maxaa yeelay, dhowr tallaabo meel u jirtay, meeshii mdaxweynihiisii lagu qarxiyay, waa ninka ka qoslaayay. Mashaqo uu walaal badan ku nafwaayay, iyo meel ay dhaawacyadu u galangalceynaayeen sidii neefaf la gawracay, ayuu daaqad ka eeganayay. Wasiirkii dowladda oo "*dhugtii yeertay*" aan ay waxna uga gidhiish ba ahayn. Muxuusan Barlamaankii uga cararin sidii Stadium Muqdishu, haddii aan uu hore wax u sii ogeyn? Eeg, bahal tii Baydhabo ka yareyd ayaa u diidday in dib dambe Xamar lugta u geeyo. Ma fulaygaasaa dad ah! Maxaa isaga haddaba dhigay weli Baydhabo? Meel uu ka dhacay qaraxii qaraxyada? Ma reer Baydhabo ayaa se uga dhow, tusaale ahaan, reer Muqdisho? Yuu u joogaa Baydhabo? Ma dantiisa mise duul kale? Isagu se sidiisa ba muxuu illan yahay? *Calaftii Maxaad Xabeed (Maxammad-Dheere)* ee xooran Saldhigga Sariiraale, ayuu kabo oo dhan adduunka haystaa; waa na nin u hadaaqa dawdawlehii oo kale. Halyeyadii Jowhar, iyo Xamar nabadda ka yeelay na, in ay Al-Qaacida yihiin, *aw noo sheegi rabaa hee day* Cali Maxaad Geeddi!

Murti ayaa jirta oranaysa: "**Haddii aadan jari karayn, dhunko gacanta cadowgaagii**." Kooy, ina Maxaad Geeddiyow! *Ciyaaw soo kud oo macsii* gacanta *eeboowgaa* Shariif, Guddoomiyaha Guddiga Fulinta Maxaakiimta Islaamka. *Anigaa Macallin Cali ku ah:* **in aan qofu xabba na kuugu faleyn**.

---

**A. M. Yusuf©** ¦ wayeel@operamail.com
**Garaacay: 09.10.2006 8:42**

---

Afeef: Aragtida qoraalkan waxaa leh qoraaga ku saxiixan

Faafin: SomaliTalk.com | Oct 10, 2006